# Xaqa Aad U Leedahay Wakiil

## Miiska ku jira


| | |
|---|---|
| Waxyaabaha uu wakiilku qaban karo | 1 |
| Doorashada Wakiilka | 2 |
| Muxuu kaa qaadan karaa wakiilkaaga | 2 |
| Soo gudbinta heshiiska lacagta | 2 |
| Soo gudbinta codsiga lacagta | 2 |
| Imisa ayaad bixineysaa | 3 |
| Haddii qof kale bixiyo lacagta wakiilka | 3 |
| Haddii aad codsigaaga racfaan uga qaadato dawladda dhexe | 3 |
| La Xiriirka Lambarka Bulshada | 3 |


Waxa aad sameysan kartaa wakiil, sida qareen oo kale, kaa caawiya marka aad la soo xiriireyso Lambarka Bulshada. Waxa aan la shaqeyneynaa wakiilkaaga sida aan adiga kuula shaqeyn laheyn.

Adiga oo laguu daneynayo, wakiilkaaga lacag kaama qaadan karo adiga oo aan ogolaasho qoraal naga helin. Hase yeeshee, wakiilkaagu wuu kaa qan karaa lacag horuamris ah marba haddii lagu shubayo xisaab keyd ah.

Adiga iyo wakiilkaaga ayaa xil idinka saaran yahay in aad noo soo gudbisan macluumaad sax ah. Waa sharci daro in aad soo gudbisaan macluumaad aan sax aheyn si bareer ah oo aad ogsoon tihiin. Haddii aad sidaa yeeshaan, waxaa la idin hor ekenayaa sharciga.

## Waxyaabaha uu wakiilku qaban karo

Marka aad magacaabato wakiil, waa uu ku matali karaa marka aad la xiriireyso Lambarka Bulshada kaasoo:

- Ka heli kara macluumaadkaaga Lambarkaaga Bulshada;
- Kaa caawin kara in aad hesho diiwanka caafimaadka iyo macluumaadka taageeraya codsigaaga.
- Raaci kara dhamaan wareysiyada shirarka iyo dhageysiga aad ka qeyb qaadaneyso;
- Codsan kara dib u eegista, dhageysiga ama Gudiga Racfaanka; iyo
- Kaa caawion kara oo adiga iyo markhaatiyaasha u diyaarin kara dhageysiga iyo su;aalo weydiin kara markhaatiyaasha.

Waxaa kale oo wakiilkaaga loo dirayaa nuqul ka mid ah go'aanka laga gaaro codsigaaga.

## Doorashada Wakiilka

Waxa aad dooran kartaa qareen ama qof kale oo aad is leedahay aqoon ayuu u leeyahay inuu ku matalo. Waxa aad sameysan kartaa wax la badan hal wakiil. Hase yeeshee, wakiil kuuma noqon karo , qof sharci ahaan, aan wakiil kuu noqon karin ama Maamulka Lambarka Bulshadu ka mamnuucay inuu dadka kale wakiil ka noqdo.

Hay'ado waxaa jira kaa caawinaya in aad hesho wakiil ama ku siin kara talo lacag la'aan ah. Wakiilada qaarkood dadka kam qaataan lacag ilaa aad ku guuleysato codsigaaga. Xafiiska Lambarka Bulshada ayaad ka heli kartaa hay'adahaas oo kaa caawin kara inaad hesho wakiil.

Qof ama laba ka tirsan xafiis kaliya ayaa wakiil kuu noqon kara ama hay'adaha kale, laakiin aanay magaacibin hay'adda, xafiiska ama wakaaladda.

Ka dib marka aad doorato wakiil waa in aad nagu soo wargelisaa **si qoraal ah** sida ugu dhaqsaha badan. Si aad sidaa u yeeshi, kala soo bax foomka Form SSA-1696-U4, *Appointment of Representative*, oo aad ka hli karto boheenna internetka ***www.socialsecurity.gov*** ama ka soo qaado midka kasta oo ka mid ah Xafiiska Lambarka Bulshada.

Waa in aad noo sheegtaa magaca qofka wakiilka kuu noqonaya magacaagana aad ku saxiixdaa. Haddii aanu qofku aheyn qareenan, waa inuu saxiixaa foomka.

## Muxuu kaa qaadan karaa wakiilkaaga

Si aad kaaga codsao lacag, waa inuu noo soo gudbiyaa heshiis aad gaarteen ama codsi uu ku caddeynayo lacagta uu kaa qaadanayo.

Wakiilkaagu **kaama** codsan karo lacag ka badan tan aan ogolaanay. Haddii adiga iyo wakiilkaaga aad isku khilaaftaan lacagta aan ogol nahay, waad na weydiisan kartaan in aan eegno.

Haddii wakiilka lacag kaa codsado ama kaa qaato adiga oo aan ogolaan, ama kaa codsado in ka badan lacagtii aad hesheesiin, waanu ka joojineynaa inuu cid dambe wakiil uga noqdo Maamulka Lambarka Bulshada.

## Soo gudbinta heshiiska lacagta

Haddii aad adiga iyo wakiilkaaga heshiis kala qorateen, wakiilaaga ayaa na weydiisanaya in aan ogolaano ka hor inta aynaan go'aan ka gaarin codsigaaga. Inta badan, waan ogolaanaa heshiiska qoraal ayaanan kuugu soo sheegnaa inta uu wakiilkaaga kaa qaadan karo marba haddii:

- Waxa aad soo gudbisay heshhiska aad wada gaarteen ka hor inta aynaan go'aan ka gaarin arrintaada.
- Labadiinaba saxiixdeen heshiiska;
- Waan ogolaanay dacwadaada waxaana lagu siinayaa macaash horey kaaga baaqday, iyo
- Lacagta aad ku heshiiseen aanay ka badneyn 25 boqolkiiba lacagtii horey kaaga baaqatay ama $6,000, hadba kan yar.

Haddii aynaan ogolaan lacagta aad ku heshiiseen, qoraal ayaan idinku soo wargelineynaa adiga iyo wakiilkaaga.

## Soo gudbinta codsiga lacagta

Waxaa suurogal ah in wakiilkaagu noo soo gudbin karo codsiga lacagta ka dib marka uu dhameeyo hawsha uu kuu qabanayo. Codsiga qoraalka ah waa in lagu faahfaahiyaa waqtiga ku baxay adeeg kasta oo uu kuu qabtay wakiilkaaga. Wakiilkaaga waa inuu ku siiyaa nuqul ka mid ah codsiga iyo waxyaabaha ku lifaaqan. Haddii aad ku diidan tahay lacagta uu codsnayo ama macluumaadka hoos ku xusan, nala soo xiriir 20 cisho gudahood. Waxaanu eegeynaa sida ay macquul u tahay kharashka uu codsanyo wakiilkaaga inaga oo qoraal kuugu sheegi doona lacagta aan ogolaanay. Haddii aadan ku qanacsaneyn lacagta (kharashaka aan ogolaanay) waa in aad 30 cisho gudahood si qoraal ah nagu soo wargelisaa.



*(rogad)*

## Imisa ayaad bixineysaa

Lacagta aan go'aanku ku gaarno inuu kaa qaadan karao wakiilkaaga waa inta ugu badan ee uu kaaga qaadan karo adeegga uu kuu qabto xitaa haddii aad ogoshahay in aad ku bixiso lacag dheeraad ah. Hase yeeshee, waxaa suurogal ah in wakiilkaagu kaa qaadan karo lacagta uu jeebkiisa ka bixiyo sida kharashka diiwaaanka caafimaadka, inaga oo aan ogolaan.

Haddii qareenka ama qofka aan qareenka aheyn uu xaq u leeyahay in lacag aan toos u siino, inta badan 25 boqolkiiba lacagta aad xaqa u yeelato ayaan kaa jarnaa (laakiin marna ma dhacdo wax ka badan) si aan ugu bixino kharashka. Waxa aan lacagta ka bixinaa dhamaan ama qeyb ka mid ah kharashka wixii soo harana waan kuu soo dirnaa.

Mararka qaarkood waa in aad wakiilkaaga toos u siisaa lacag;

- Waa in aad bixisaa inta kugu hartay haddii lacagta aan ogolaanay ay ka badan tahay lacagta laga jaray ee la siiyey wakiilkaaga.
- Lacagta oo dhan waa in aad bixisaa haddii:
  - —Wakiilkaaga uusan xaq u lehyn in aan toos u siino lacag;
  - —Dacwadaada xaq uguma aadan yeelan lacag hore oo kuu baaqatay,
  - —Aynaan kaa jaran 25 boqolkiina lacagtii hore ee kaa baaqatay macaashka Lambarka Bulshada amd Kabitaanka Dakhliga ee Lambarka Bulshada, ama labada; ama
  - —Wakiilkaaga oo codsaday waqtiga ku haboon lacagta adiga ayaanan lacagta kuu soo dirnay lacagtii aan kaa jari laheyn.

Waa in aad bixisa kharashka uu wakiilkaaga jeebkiisa ka bixisyo ama la filayo inuu ka bixisyo (sida kharashka uu ku bixiyo codsiyada diiwaankaaga caafimaadka iyo kan isbitaalka).

## Haddii qof kale bixiyo lacagta wakiilka

Waa in inaga ogolaanaa kharashka, xitaa haddii ay cid kale kharashak kaa bixineyso (tusaale ahaan saaxiib ama qaraabo), haddii aanay aheyn:

- Cidda kharashka bixineysa Kharashka waxaa bixinaysa ganacsi, hay'ad aan faa'iido doon aheyn ama dawladda dhexe, gobolka, degmada ama magaalada iyo lacagaha kale ee miisaniyadda; oo
- Adiga iyo inta macaashka xaqa u leh aanay si toos ah ama si dadban mas'uul uga aheyn bixinta dhamaan ama qeyb ka mid ah kharashka wakiilka ama cid kale; iyo
- Wakiilkaaga ayaa noo diray qoraal uu ku muujinayo in aadan bixineyn wax lacag ah ama kharash ah.

## Haddii aad codsigaaga racfaan uga qaadato dawladda dhexe

Maxkamaddu waxa ay ogolaaneysaa kharash macquul ah inuu kaa qaado qareenkaaga. Nalagama doonayo in aan ogolaano kharashkaas. Kharashkaasi kama badanayo 25 boqolkiiba macaashka kaa baaqday ee go'aanka maxkamadda lagu ogolaaday. Qareenkaagu kaama qaadi karo lacag dheeraad ah maxkamadda ka hor.

## La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

### Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda ***www.socialsecurity.gov***. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambarka Bulshada*), ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka

*(rogad)*

bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;

- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada laguu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

## Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.

Securing today
and tomorrow

**Social Security Administration**
Publication No. 05-10075-SO | June 2017
Xaqa Aad U Leedahay Wakiil
Your Right to Representation (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha